

Miin leeyda sheekada. 2024

#MIINLEEY,2024

(caqiidadeeyda miinleey.)

marharaan ka-maray dhaar inaanmaanso tiriyaaye miinleeyda
waasheeko maanso loo ekeysiiyay.

Anigaan macbuudkeeyga Lafo&maqaar maahan

(Tabaraka allaah,axsanalkhaliqin)

Masalana masiisaarna,markalana masoosaarna,mid Malaa`ig sido
maahan .Makhluuqaadka gebigoodba mid maciin karabo maahan.

-Macbuudkeeyga Anigaan mid lalamidoobi-karo maahan, iskumilan
midkaas sheegay markahoraaba maankaaga makhluuq caabud
kaeheeyde, mahwigana adaakeenay,doodeeydaan murankeeda.

-Jibriil & Muxamadkeena mursaliinta gedigood mideey
lamidoobi-karayaan maahan.

-meelo badanba,Diinteena Nabigeey amaantaaye,
Misbaaxda & nuurkeeda,waxa eeylameeljoogtay Macbuudkood
amaantaaye, ileeskaas,inoo muuqdo waa makhluuqe Illaah
maahan.magacyaa naloosheegay sifo muuq-uyeel maahan.
Quraankana kasoobaaro sifo maba naloosheegin .mardanbaa
nalookeenay, Quraankeena kuma qeexna Illaah muuqdo sifahiisa.

=====

Miinleeyda 2-aad

(carshiga)

-Aniga maanso maaqaano misbaax-surantay maankeeyga ayaan miinka
kahingaadshay.waana sheeko miinleey ah.

Carshigana,maciindoonka,Malagaaxanbaaraayo,moowlaheeyga
mabasaarna.kursigaa-lameeljoogo.

Makhluuqaadka gedigoodba moowlaheena umabaahna

(idaasalka,cibaadii,canii)

mid dhawaansho lagusheegay kacbadow mushaaxaahe ukaalaya
miyoowsheegay kii Keenya kadhawaaqay

=====

#Miinleeyda,3-aad.

-Anigaan macbuudkeeyga

Miskiga udgoon maahan sida Timir macaanmaahan
humaaga&muuqaalka intamaanka sawirtoodhan moowlaheeyga kaas
maahan.

-Muruq&awoodeeyda intaan miinka kahingaadshay mahadeeda Rabigaa
leh.

-ma lulmoodo manaliico inta hurdo masootooso.

-Quraan waaye masxafkeena,isagana makhluuq waaye.

(waa makhluuq kitaabkeena)

Hadaad muran kakeentana maxaa maktabada iisaaray?.

marka moowdka ihaleelo aakhiro markaanjoogo Albaqraa

imaaneeyso,igu Sawir hajoogtee Alcimraan agjoogsaday Ilaah maan
agjoogaa .

Quraan iimaciinaayo Sida Nabiga soow maahan.

In makhluuq Kitaabyahay Bukhaaraa marhore qiray.ana waan
kameersaday.

-miinleeyda aantiriyay horay-maanan uaqoonin .

Muuqmaleh macbuudkeeyga.

Muuqlaay hawana maahan.

Nabi Muxamad udgoonkiisa miskigoow lameeljoogay.

intasoo`udgoontiyo,intakalee,udgoonlaay

ILLAAHEENA saasmaahan.

--

Moowduucaan caqiidada marhoraa aqiinay,Waamiraha toowxiidka

Balse MIINKA SHEEKADA weligeey maweeleeyn.

--

-Sanadkoo labaatan ah ,afar&labaatan ah,Soonqaad ma sadexbaa.
maba`aan salaamine Soomaalidoo idil ,seetihiin manabad baa?.

>>DHAMAAD<<

=====

=====

SHEEKADA SHARAXAADYAR AAN RAACIYO .

Aayadaha & Axaadiista aan soo daliishaday.

الَّذِينَ يَحْمِلُونَ الْعَرْشَ وَمَنْ حَوْلَهُ يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ

غافر[7]

--

اللَّهُ نُورُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ مِثْلُ نُورِهِ كَمِثْكَوَاةٍ فِيهَا مِصْبَاحٌ الْمِصْبَاحُ فِي زُجَاجَةٍ الزُّجَاجَةُ كَأَنَّهَا كَوْكَبٌ دُرِّيٌّ يُوقَدُ مِنْ شَجَرَةٍ

[النور.35]

وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِي عَنِّي فَإِنِّي قَرِيبٌ أُجِيبُ دَعْوَةَ الدَّاعِ إِذَا دَعَانِ فَلْيَسْتَجِيبُوا لِي وَلْيُؤْمِنُوا بِي لَعَلَّهُمْ يَرْشُدُونَ

[سورة البقرة:186].

فَاسْتَغْفِرُوهُ ثُمَّ تَوْبُوا إِلَيْهِ إِنَّ رَبِّي قَرِيبٌ مُجِيبٌ

[سورة هود:61]

عن أبي أمامة الباهلي رضي الله عنه قال سمعتُ رسولَ الله صَلَّى الله عليه وسلَّم يقول: اقرأوا القرآنَ فإنه يأتي يومَ القيامةِ شفيعاً لأصحابه

(804) ... رواه مسلم

وعن النواس بن سميان رضي الله عنه قال: سمعتُ النَّبِيَّ

يقول: يُؤْتَى بِالْقُرْآنِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَأَهْلُهُ الَّذِينَ كَانُوا يَعْمَلُونَ بِهِ

تَقْدُمُهُ سُورَةُ الْبَقَرَةِ وَالْأَمْرَانِ وَضُرِبَ لَهُمَا رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ثَلَاثَةَ أَمْثَالٍ مَا نَسِيْتُهُنَّ بَعْدُ قَالَ كَانَهُمَا غَمَامَتَانِ أَوْ ظُلَّتَانِ

سَوْدَاوَانِ بَيْنَهُمَا شَرْقٌ أَوْ كَانَتْهُمَا جَزَقَانِ مِنْ طَيْرٍ صَوَافَّ تُحَاجَّانِ عَنْ صَاحِبَيْهِمَا.

(805) رواه مسلم

=====

#SAYIDKA & GABAY CAQIIDO KA HADLAAYO.

Sayidku caqiidadii Af carabiga ku qorneeyd buu af Soomaali ugu beddelay si ay dadka waxbarashadu ugu fududaato. Kolkaas caqiidadii oo af Soomaali ah oo lagu marinayo jibka la yiraahdo jiipto waa tan, dadkiina si dhib yar ayuu u bartay.

Wuxuu yiri:

Ilaaheennii jaliilka ahaa labaatan sifaa, u waajibtayoo
Inuu jiro baa u waajibtayoo, hadduusan jirin ma joogneen
Hadduu ina joojiyaad aragtaan, inuusan jirin ma suurowdo
Inuu jiri jiraa u waajibtayoo, haddii kale yaa jirreysiiyoo
Inuu jiri doonaa u waajibtayoo, haddii kale yeyna jaaseynoo
Jinni iyo insiba waa khilaafsanyahoo, haddii kale waaba jayshkoodoo
Sidii dadka jiir iyo dhiig ma lehoo, sidii axad meel ma joogsado
Jinaad iyo feero dhinaciyoo, calool iyo bariyo joof ma lahoo
Janbeyn iyo koriyo hoos ma lehoo, jaliil jaah horiyo dabi ma leh
Ilaah jismigeenna haw dayinoo, haddii kale laysku jaangooyoo
Jaliil kelinimaa u waajibtey, ninkii jigtayow jaxiima galey
Ninkii laba jago jeclaysanayey, jifeeyaay waa junuun falan
Hadday jiniin wada abuurayaan, alley jilicanaa Ilaahyadu
Jamaalka Ilaah ninkii qaybshow, Allow jahanama ha kaa deyn
Ninkii bir jarbarid u waajibiyow jiriid kuus, jaawa geel waa waayoo
Jaahaa gubayey jalleeca xumow, allow yaa qool ku jiqilleyoo

Ninkii jaxarnimo sifuu baadiyow, jar dheer baa Eebbe kaa ridi
Nolol jiridaa inuu leeyahay, wallaahu waygu jaamaca
Haddii kale waa jamaad ruuxlee, nuxuu jilahoo cid tarayaa
Wuxuu jiriyo waa awoodaayoo, hadii kale yow jiriirixin
Ninkii jebin kara anow fasaxaye, ninnaa jeefaafo haw gelin
Ninkii xarbad jilibka ugu dhigayow, jiilaajilo badan usoo guro
Jaliil qudra ma leh jikraar weeyee, dadow jamacoo bal jiir uun
Haddaad jigateen jid roon qaadoo, jaahilyow Eebbahaa baro
Haddii kale anigu kaa jeestaye, baluun juuq gabana iga maqal
Jinnigii isha caddaa iyo, aabbow jifiliille kuu tali
Ilaaheen lama jikraarayoo, wuxuu doonuu jiteystaa
Haddaan xukunkiis sidii jibin dhicin, jabaabiraduusan laayeen
Waxaan jaad samayn Ilaahay ma amree, Allow aan helo na jeefagan
Haddii uu jirimo kula doonana, jidka rillo kuma ibaaxayn
Wixii uurka laga jeclaysanayiyo, Ilaah Jowrka waa arkaayaa
Wixii bad moolkeed ku juluq yiri iyo, wixii jiifa waa ogsoon yahay
Wixii jira waa arkaayaayoo, wixii joogana waa arkaayaa
Wixii jurmaliyo wixii sowl leba. jamiicinimo waw arkaayaa
Haddii kale jiita oo dhuuntoo, ku jawjawleeya Eebbehayoo
Wixii juuq yiri Ilaah maqalyoo, waxaan juuq oronna waa la midoo
Haddii aan jubuq Ilaah maqli karin, muxuu baryada uga jawaabaa?
Wixii dhulka hoose jeeb ku leh iyo, wixii jiriba waa ogsoon yahay
Haddaan been lagu jalbeebanahayn, waxaan jirinna waa ogsoon yahay
Ninkaan hadalkayga juqihaynow, haddaan lagu jirin ku jaangoosoo
Ninkii janna doonayow joogsoo, kalaakalkaygaa ha jaaxidin
Ninkii muuminnimo u jeelqabow, xayaadkayga u jimiimica
Sidii jaan karuur u fiiqsada oo, sidii ramag jaar ka buuxsada

Sidii jookhiyo xariir u jantoo, sidii jirka dhacay u jalalaba...

=====

#Gabaygaan Abwaan dhoodaan ayaa tiriyay.
Ilaahii Cirshiga nuuriyoow, waanu kuu cabane
Waxaad adigu caabiyi kartaa, ciidhoo noo taraye
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Adigaan cirriyo geeri iyo, cudur ka yaabayne
Adigaan cadrana guursan oon, ciyaal dhaline
Adigaa waxaad camal rabtaa, kugu cuslaanayne
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Aadaan cudud lagu sheeganayn, amaan cabsoonayne

Aadaan ciidan loo qayshadiyo, caawimaad rabine
Col wax yeelo gaystiyo aadaan, cadaw ka yaabayne
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Cunto kaa dhamaatiyo aadaan, caydh ka baqanayne
Calal xidhasho uma baahnid iyo, cuud la foofsado e
Ku cayiliyo adigaan ahayn, shay mar caato ahe
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Aadaan canug lasoo dhalay ahayn, ama ciyaal reere
Aadaan barina meel kula cawayn, cuur filkaaga ah
Cashiiriyo qaraabiyo aadaan, ciirsi deydeyine
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e

Aan cabbaar tilmaamaha cuddoon, sii carcooriyo e
Caddaan fiila cawl iyo guduud, amaa cillaan miida
Casaan boosa maarriin canbara, ama cawiif booda
Madoow culaya sugul caynaba, oo ciiriyo bay leh
Xareed calasa ciid iyo asal, ama cagaar dooga
Caarcaar shabeel ama sidii, calawyo giirgiiran
Cir guduud qaboonoo kaliyo, cawo iyo maalin
Cadar ama cadceedoo kaliyo, sidii roobab curanaaya
Caadkiyo daruuraha dhulkiyo, ciirigii badaha
Codcod subaga caaniyo baruur, cuddo iyo jiidhba
Laan caaradeed shay ka baxa, ama curdaan yeesha

Wax la cuno ama aan calashaniyo, waxaan cabbaynoo dhan
Wax codkiisu yeedhiyo waxaan, ciyi aqoonaynin
Calaamiyo wixii midab ah ee, caalamka u muuqda
Cabbirkaaga shay lihi ma jiro, ood la caantahaye
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Adigaa cilmiga soo dajiyo, diin ciraab badane
Cabdigaagii adigaa ka dhigay, nabi carfoonaaye
Cadadii qur'aankiyo adigaa, curiyey Liilaafe
Ilaahayow casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Cindallaahi ruuxii qabee camal, fashee fiican

Een Nabiga caaradin unbaa, kheyrr cantoobsada e
Halaag bay cantuugaan kuwii, aad u cadhootaaye
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e

Janna caaliyaad suubisay oo, laga cabbaayaaye
Cadaabkiina adigaa dhisiyo, naar ciqaab kulule
Ciyoon baad dhamaysaa wixii aad, cidhib tiraysaaye
Kaad caawinaysana dhaqsaad, u camiraysaaye
Cazaa Wajala waad og tahay, caynka aan rabo e
Aadaa siiya laydh caafimaad, gaal ku caasiyeye
Caascaasna adigaa ku rida, sheekh ku caabudaye
Nina inaan cadaadshiyo ma rabo, inaan cidhiidhyaaye
Carrabna kuma idlayn karo waxaan, kaaga soo cabane
Rabbul Carshul Cadiim (cathiim)waad og tahay, caynka aan rabo e

Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Inkastoo cad shaydaan qalbiga, caajis galinaayo
Calooshayda kama goyn inaan, Eebe caabudo e
Citiraafay Nabigaygii oo, caashaq baan ahaye (csw)
Ilaahayow Casiis baad tihiyo, caadilkii jira e
Cimrigay intaan noolahee, aan carrada joogo
Ceebtiyo waxaan ugu necbahay, ciil na daashada e
Mana lihi awood celin kartiyo, xoog cadaadshaba e
Ilaahii Cirshiga nuuriyoow, waanu kuu cabane
Inaad adigu naga caawisaan, kaa codsanayaaye

=====